Warbixin ku socota waalidka/ardayga iyadoo ay la xiriirto bilowga dugsiga

Iyadoo ay la xiriirto bilowga dugsiga-muhiimka uu leeyahay aqoonsiga waqtigiisa uusan dhicin ``e-legitimation``

Waxaa rajadeenu tahay ineysan imaan sii fidida cudurka covid-19 sidii hore uu u fiday xiligii la soo dhaafay. Laakiin waxaa jirta halis taasoo xitaa iyada laftigeeda aad u baahan tahay inaad iska qaado saamiga cudurka covid-19. Saas darteed waa muhiim adiga buuxiyey da`da ama mar dhow buuxinaya 13 sano inaad sameysato mid adiga kuu khaas ah aqoonsiga elektarooniga (e-legitimation), haddii aadan heysan hadaba, taasoo markii aad u baahato aad u isticmaali karto saami iska qaadistaada cudurka covid-19.

Gobolka Värmland waxay ku martiqaadayaan qaadista saamigaaga cudurka covid-19 qof walba oo buuxiyey sannadka 6da sano. Laga bilaabo marka la buuxiyo da`da 13 sano waxaa loo baahan yahay adiga inaad ku gasho aqoonsiga elektarooniga ah oo uusan waqtigiisa dhicin (e-legitimation) dhinaca adeega elektarooniga halkan 1177.se adigoo isticmaalaya saamigaaga aad iska qaadeyso. Waalidka waa ineysan sameyn iney wakiil ka noqdaan carruurta ka weyn 12 sano marka laga hadlayo adeega elektarooniga halka 1177.se, tani waa sharciga qaranka.
Midaasoo saas darteed ay muhiim tahay adiga buuxiyey da`da 13 sano inaad heysato mid kuu gooni ah aqoonsiga elektarooniga kaasoo kugu shaqeynayaa gelitaanka halkan 1177.se.
Aqoonsiga elektarooniga la ansixiyey ee lagu gelaayo adeega elektarooniga waa bangiga aqoonsigiisa iyo Fereeya adeega aqoonsiga (Bank-id och Freja e-id plus).
Bank-id Aqoonsiga Bangiga ka dalbo adiga bangigaaga. Bangiyada waxay leeyihiin shuruudo kala duwan xaga da`da, laakiin haddii ay da`daada ay ka hooseyso 18 sano waa khasab inaad adiga ogolaansho ka heysato waalidka. Ogow waxa loogu yeero moobilka aqoonsiga amniga uusan shaqeyneyn ku gelista adeega elektarooniga halka dhinaca websaytka 1177.se.
Freja e-id plus qoonsiga Fereeya waa bilaash, iswedhish aqoonsiga elektarooniga (e-legitimation). Marka aad sameysaneyso fereeya aqoonsiga (Freja e-id plus) waxaad u baahan tahay moobiiladan gacanta oo casri ah ama shaashada yar, aqoonsi meesha oo aad joogto iyo e-meyl akoon. Marka abka lasoo dejisto iyo diiwaangelintii dhamaato waxaad u baahan tahay adiga inaad soo qaadato telefoonka iyo warqada aqoonsiga ee wakiilka elektarooniga ah ee la ogolaaday.Qofka ah mid ka hooseeya 18 sano waa khasab inuu ogolaansho ka heysto waalidkiisa.

Waan jecelnahay inaad hubiso inaad ku geli karto halkan 1177.se aqoonsigaaga elektarooniga!

Is-diiwaangashanka xirmada saami qaadista

Haddii ay noqoto in faafintii isqaadsiinta ee xaga bay`ada dugsiga xiliga dayrta gudihiisa waxaa dhici karta saami qaadista dugsiyada in la fulin doono taasoo loogu yeero is-diiwaangashanka xirmada saami qaadista. Is-diiwaangashanka xirmada saami qaadista macnaheedu wuxuu yahay saamigaas la qaadayo uma baahna in hore loo balansado dhinaca adeega elektarooniga halka 1177.se, iyadoo aan ahayn tii la muunadayn lahaa ayaa kan saamiga iska qaadaya nafsadiisa diiwaangelinaya saamigaas dhinaca adeega elektarooniga iyadoo la xiriirta saami qaadistiisa.

Go`aanka ku saabsan saami qaadis oo la xiriirta in la ogaado faafida cudurka oo ah xiriiro isu dhaw waxay ka dhex dhaceysaa talooyin ay isdhaafsadaan inta u dhexeysa dugsiga iyo kuwa ka hortaga cudurada faafa ee Värmland. Sidee loo qaadaa saamiga iyo geyntiisa waxay u dhacdaa sida loola qabsado kadib xaaladaha iyo waxaa dhici karta iney yihiin dugsiyo kala duwan iyo xiliyo kala duwan. Sidoodaba intooda badan sidaan ayey u egyihiin:

- Ardeyda iyo shaqaalaha ay saameyso arinta waxay ka helayaan dugsiga xirmada saami qaadista.

Region Värmland

- Saami qaadista waxaa lagu sameynayaa is tijaabin ahaan dugsiga ama guriga. Ardeydu waxay u baahan karaan taageero dadka waaweyn qaadista saamiga iyo diiwangelinta.
- Si aad diiwaangeliso saamiga adeegyada elektarooniga halka 1177.se waxaa lagaaga baahan yahay inaad heysato aqoonsig elektarooniga oo la ansaxiyey.
- Dugsiga waxay soo ururinayaa saamigii la qaaday u sii wadaan oo ay u gudbiyaan sheybaarkii baarayey.
- Jawaabta saamiga waxaa lagu bandhigayaa adeegyada elektarooniga halka websaytka 1177.se

Su`aalo iyo jawaab ku saabsan aqoonsiga elektarooniga ah iska-qaadista saamiga

Sababtu maxay tahay waalidka uusan ugu geli karin aqoonsigiisa elektarooniga si uu balan ugu sameeyo ilmaha dadooda u dhaxeyso 13-17 sano?
Waalidka waxay arki karaan warqadaha caafimaadka ee ilmihiisa wax u qaban karaan ilmihii arimhiisa ilaa inta ay ka buuxinayaan da`da 13ka sano. Sababaha qarsoodiga awadeed ayaa sidaas darteed qofka dhallinyarada ah laftiisa uu ku galaya aqoonsigiisa elektarooniga u goonida ah si uu ugu isticmaalo adeega elektarooniga.Kan buuxiyey da`dii 16ka wuu awooda inuu akhristo warqadihiisii caafimaadka.

Sababtu maxay khasab u tahay in la sameysto aqoonsiga elektarooniga ah xitaa inta uusan ilmuhu xanuunsan?
Inta badan loo waxaa baahan yahay in qofka meesha uu joogo bangiga ama wakiilka elektarooniga si uu u sameysto aqoonsiga elektarooniga ah. Qof leh astaamo laga yaabo iney yihiin calaamadaha covid-19 waa in uusan la kulmin dadka kale.

Muxuu kaluu dheeraad ah uu u isticmaali karaa qofka dhallinyarada ahi aqoonsigiisa elektarooniga?
Adeegyada eletarooniga ah halka dhinaca websaytka 1177.se qofka dhallinyarada ah wuxuu tusaale ahaan la xiriiri karaa mid xarunta dhallinyarada lagu qaabilo, balan ka sameysan karaa, ka codsan karaa warqada daawada lagu soo qaato oo cusub iyo ka dalban karaa in laga qaado tijaabada jabtada. Waxaa jira xitaa hay`do fara badan oo uu shaqsigaasi isku cadeyn karo aqoonsigiisa elektarooniga. Aqoonsigaaga bangiga waa kuu suurtageleysaa inaad ku dhameysato arimahaaga bangiga.

Wax khatar meysa ka imaan karin in qofka dhallinyarada ah uu u isticmaaloo aqoonsiga elektarooniga tusaale ahaan adeega khadka?
Aqoonsigaan elektarooniga ah Freja e-id+ uguma shaqeynaayo in lagu adeegto laakiin keliya adeegyada degmooyinka,caafimaadka gobolada iyo dawllada ``kommuner, regioner och myndigheter``. Dadka dadooda ka hooseyso 18 sano guud ahaan ma geli karaan heshiis ama masoo iibsan karaan alaab iyadoo ogolaasho aysan ka heysan waalidka.

Qofka dhallinyarada ah ma ku xafidan karaa aqoonsigiisa elektarooniga ah waalidka moobiilkiisa ama hal bashaashad oo ka wada dhaxeysa?
Tani waa mid suurtagasha xaaladaha qaarkood,laakiin qof walba waa inuu isaga nafsadiisa galaa kuna galaa tirooyinkiisa ``kod``. Bal fiiri qofkaan dhallinta ah bangigiisa waxay arintaan ka leeyihiin.

Haddii qofkii dhallinyarada ahaa uusan ka gaarin inuu sameysto aqoonsig elektaroonig intuusan xanuunsan-sidee wax u sameyneysaa markaas?
Markaas waxaad wajaheysaa xaruntiisa bukaan socodka caafimaadka si aad uga qaado saamiga meeshaas.